

## Ogeysiis ku saabsan helidda Maxkamada

### **Saacada kooban un ayey guriyaha Maxkamadaha Maine dadweynaha u furnaanayaan.**

Dhageysiyo maxkamad badan ayaa **dib loo dhigay amaba la baajiyey.**  
Fadlan eeg <https://www.courts.maine.gov/covid19.shtml> wixii macluumaad dheeri ah.

Saacadaha isbuucaan ayaa ku liisgareysan luqadda-Ingriiska ee dhinaca kaga dhagan ogeysiiskan.

***Inta lagu jiro xaaladaan caafimadka dadweynaha ee degdega, waxaan balan qaadeynaa inaan sameyno wax walbo oo aan kari karno si aan u dhowrna caafimaadka iyo badqabka shaqaalaheena iyo dadweynaha yimaada guriyaheena maxkamadaha.***

Sidaa darteed, fadlan **HA SOO** galin maxkamadda haddii:

- Aad ka soo safartay 14kii maalmood ee ugu danbeeyey gudahooga meel uu ku baahay COVID-19 faafa;
- Degantahay ama xiriir dhow la yeelatay qof ka soo safray meel uu ku baahay COVID-19 faafa 14kii maalmood ee ugu danbeeyey gudahooga; ama
- Cusbital ama hayad caafimaad kaa dalabtay inaad is karantiisho; ama
- Lagaa helay, ama xiriir la laheyd, qof laga helay COVID-19; ama
- Aad dareemeyso astaamo xanuun ba'an xaga neef-mareenadda (i.e. qufac, neef yari), astaamaha u eg kuwa duriga, xummad leedahay, ama qufaceyso ama hindhishooneyso.

Haddii wax kuwaasi ka mid ah ku khuseeyaan, **fadlan la xiriir Maxkamada 207-753-2999 eena weydiiso turjumaanka *Language Line*** si balan danbe loogu sameeyo adeegaaga ama ka soo muuqashadaada taariikh danbe. Adeegyada turjimidda qadka telefoonka ayaa la bixin doona.